


PRSR STD
US Postage
PAID
Seattle, WA
Permit No. 2871



Waxaan doonaynaa in aynu magalno ra'yigaaga kusaabsan isbedelada lasoo jeediyay ee meesha gaariga la dhigto ee Magaalada Columbia. Fadlan nagala soo xiriir cinwaankan ColumbiaCityParking@seattle.gov marka ay tahay Febraayo 20, 2017.

Magaalada Columbia way sii weynaanaysaa. Sannadkii lasoo dhaafay SDOT waxay dhagaysatay ra'yigaaga kusaabsanaa dhibaatooyinka aad ku qabtid meel aad gaarigaaga dhigatid waxayna dhammaysay daraasado baddan oo gaari meel dhigashada ah. Ayada oo ay midaan ku salaysantahay, SDOT waxay soo jeedinaysaa isbedelo lagu sameeyo meesha waddada gaariga la dhigto ee u dhow Degmada Waddada Ganacsiga Rainier (Rainier Avenue Business District). Isbedeladaan waxaa loogu talagalay in meelo baabuurta la dhigto ay helaan dadka meesha degan, macaamiisha, dadka boogashada ku yimaada, iyo dadka meesha ka shaqeeya. Ka fiiri gudaha wixii faah-faahin ah.

 **Seattle**
Department of
Transportation

P0 Box 34996
Seattle, WA 98124-4996

SOMALI

 **Seattle**
Department of
Transportation

Maxay kula tahay adiga?

Marka aynu la hadalnay dad ku nool Magaalada Columbia, waxaan maqalnay wel-welkaaga ku aadan gaari dhigashada iyo wareega. Isbedeladaan lasoo jeediyay waa kuwo kusalaysan adiga ficil-celiskaaga ama faalo bixintaada iyo daraasado lagu oggaaday in waddada meesha gaariga la dhigto ay aad u buuxdo oona ay adagtahay in laga helo bartamaha Magaalada Columbia.


Soo jeedintaan waxay ku dari doontaa meelo gaari la dhigto oo lacag ah aasaaska Magaalada Columbia iyo xad wakhti lacag la'aan ah oo la dhigto dhismooyinka ku wareegsan ama dhinacyada ku yaala si loo wanaajiyo wareega gaari dhigashada loona helo meel gaari dhigasho la isku halayn karo. Sidoo kale waxay sii waacinaysaa ama balaarinaysaa Caaga 29 ee Gaari Dhigashada Xaddidan sida sawirka kaaga muuqata. Dhammaan cinwaanada ku yaala gudaha goobta RPZ ee la waasiciyay waxay noqon doonaan kuwo u qalma in loo fasaxo ama loo oggolaado. Su'aalaha Soo Noq-noqda Marwalba, ay ka mid tahay macluumaad baddan oo ku saabsan RPZ, waxay ku jiraan ama ku qoranyihiin bogga internetka mashruuca.

Si loo wanaajiyo wareega goobta, waxaynu balaarin doonaa ama ku dari doonaa Meelo yar oo Aan gaariga la dhigan karin oo ay la jirto dhismooyinka bariga Rainier. Sidoo kale waxaynu wanaajin doonaa calaamadaha Meelaha Aan gaariga la dhigan karin ee ku yaala kala goysyada ama meelaha la isugu kala gudbo ee ah Waddada 37da iyo 39ka S marka isbedelo kale la sameeyo.

Fursadaha ficil-celinta ama faalo ka bixinta

Tooska internetka: Fadlan nagala soo xiriir cinwaankan ColumbiaCityParking@seattle.gov marka ay tahay Febraayo 20, 2017.

Si shakhsi ah: La hadal SDOT marka ay tahay Febraayo 4, 2017 laga bilaabo 10 SUBAXNIMO – 12 DUHURNIMO ee jooga Kullanka Deriska SE ee ka dhacaya Qolka Boqortooyo(Royal Room), 5000 Rainier Ave S.



Isbedelada Lasoo jeediyay

- La bixiyo, \$1/saacadii, 8 SUBAXNIMO – 8 HABBEENIMO Asniinta-Sabtida, Xadka 2 saacadood ah (80 boosas)
- - - RPZ, 7 SUBAXNIMO-6HABBEENIMO, Asniin-Jimco, 2 saacadood aan ka ahayn haddii lagu oggolaado (390 boosas)
- Xaddadka Wakhtiga Lacag La'aanta ah, 2 saacadood 7 SUBAXNIMO – 6 HABBEENIMO Asniinta - Sabtida (40 boosas)
- Calaamada Tusinaysa Gaariga In Aan La dhigan karin
- Samaynta Meelo Gaarigu Ka-wareego
- - - In loo Wareejiyo Hal Boos Kaliya Meel Rakaabka laga Qaado 5 GALABTII – 2 SUBAXNIMO
- Ku dar Boosas Cusub oo Baabuurta la dhigto oo RPZ 29 ah

Macluumaadka Mashruuca, Su'aalaha Soo Noq-noqda Marwalba, iyo Xiriirka

www.seattle.gov/transportation/parking/cp_ColumbiaCity.htm

limayl: ColumbiaCityParking@seattle.gov ama soo wac (206) 733-9026

For translated versions, please see project website or call (206) 733-9026.

Para obtener versiones traducidas, consulte la página web del proyecto o llame al (206) 733-9026.

Để đọc các bản dịch, vui lòng xem trang web của dự án hoặc gọi số (206) 733-9026.

如需翻译的版本，请参看项目网站或拨打(206) 733-9026。

Para sa mga bersyon na nasalin-wika, mangyari lang magpunta sa website ng proyekto o tumawag sa (206) 733-9026

ለተተረጎሙ ሕትመቶች፣ እባክዎ የፕሮጀክት ዌብ ሳይት ገጽ ይጎብኙ ወይም በስልክ ቁጥር (206) 733-9026 ይደውሉ።

Haddii aad u baahantahay nuqulo turjuman, fadlan gal bogga internetka mashruuca ama wac (206) 733-9026.

Gosawwan kiikaatiif, maaloo marsariitii projektichaa ilaalaa ykn (206) 733-9026 irratti bilbilaa.

ንዝተተርጎሙ ሕትመት፣ ብኽብረትካ ንመርብብ ሓበሬታ ረክ ወይ ድማ ብተሌፎን ቍጽሪ (206) 733-9026 ደውለልና።